

Tilmaamaha Waalidka Dugsiga Barbaarinta Caruurta (Kindergarten)



Macluumaadka Diiwaan-gelinta Dugsiga Barbaarinta Caruurta (Kindergarten), Kindergarten Plus & Iskuulada Magnetka

Waa daabacaada Dugsiyada Hoose & Waxbarashada Jaaliyada
www.district196.org

INDEPENDENT SCHOOL DISTRICT

Rosemount-Apple Valley-Eagan
Public Schools

#196

Educating our students to reach their full potential

Waalidiin Ku soodhawaada!



Waan ku faraxsan nahay in aan idinku soo dhawayno Dugsiga Barbaarinta Caruurta (Kindergarten) ee Degmada 196. Aad baad ugu mahadsan tahay waqtiga aad qadaneyso in aad ku aqriso Tilmaamaha Waalidka ee Dugsiga Barbaarinta Caruurta (Kindergarten) iyo in aad iskaaga u ogaato Degmada Dugsiga Barbaarinta Caruurta ee Degmada 196 ee dalabyada iyo hanaanka diiwaan-gelinta Dugsiga Barbaarinta Caruurta (Kindergarten).

Degmada 196 waxay leedahay 18 dugsi hoose ee “xaafadaha”, ku waasoo bixiya barnaamijyada Dugsiga Barbaarinta Caruurta (Kindergarten) sida caadiga nus maalinlaha ahaa iyo Kindergarten Plus. Sedex ka mid ah 18 kan iskuulo ee xaafadaha ku yaala waa iskuulada magnetka, ku waasoo bixiya manhajka degmada caadiga, balse midkiiba wuxuu leeyahay maadooyin ku taqasuso ulana xiriira manhajka degmada ee muhiimka ah.

Waxaa laga yaabaa in aad xiiseyneyso habeenka macluumaadka ee Kindergarten Plus/Dalabyada Iskuulka ee ka dhici doona Greenleaf Elementary dhici doona (Janaayo 5teeda) ama Glacier Hills ee Dugsiga Hoose ee Aadaabta iyo Sayniska dhicina doona (7da Janaayo). Booqashada lagu soo booqanaya iskuulada magnetka iyo iskuulada xaafadaha ayaa la qaban doonaa inta lagu jiro sitimaanka Spotlight on Schools oo dhici doona 1 ka Janaayo. Faahfaahin dheeraad iyo waqtiyada la qaban doono ka eeg bogga 6aad.

Si aad wax badan uga barato dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) ee caadiga, Kindergarten Plus iyo iskuulada magnetka ka eeg boggaga 4-9. Haddii aad wax su'aalo ah oo ku saabsan kuwa ka mid ah dalabyada dugsiyada barbaarinta caruurta (kingergarten), macluumaadka aad kagala xiriir karto wuxuu ku qoran yahay bogga gadaal dushiisha.

Waxaan rajeynayaa in Sitembarka xigga aan canugaaga ku soo dhaweyno dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten)!

Falsafadeena Dugsiga Barbaarinta Caruurta (Kindergarten)

Hadafka waxbarashada waa in la dhiiri geliyo kobcista caruurta ku waasoo ah kuwa faraxsan, naxariis badan, iskooda hal-abuura, curiya, su'aalaha oo daneeya in uu waxbarto. Dugsiga Barbaarinta Caruurta (Kindergarten) waxay dadabtaa aassaaska qibrada waxbarashada ayada oo ay bixiyaan fursadaha ku haboon tayoyinkan si ay kobcin u sameeyaan.

Howsha Dugsigeena Barbaarinta Caruurta (Kindergarten)

Barnaamijka dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) ee Degmada 196 waxay bixisaa bay'ad canug kasta lagu xishmeeyo sida shaqsi gaar ah. Barnaamijkeena dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) wuxuu jawaab-celin u yahay baahidaha, danaha, dabciyada kala duwan iyo hababka uu arday kasta wax- ubarto. Bay'adda fasalkana waa meel nafaqeysa oo ardayda soo dhaweysa.

Waxbarashada dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) waxay dhiiri-gelisaa kobcinta xalintaha dhibaata, go'aan gaarista iyo xirfadaha wada-hadalka, iyo waxay ay taageertaa waxbarashada wada-shaqeynta, bulshaynta, kalsooni caafimaad qab iyo curiya, hal-abuur. Kobcinta waxay dhacdaa inta ay caruurta si wada qaba ah uga qeyb qaataan howlaha waaqaciga, gacmaha maalin kasta ku qabtaan.. Maclimiinta ayaa ah kuwa go'aamiya howlaha laguna saleeyo caruurta fasaladooda iyo ayadoo lagu dabaqyo manhajka. Caruurta waxay fursad u leeyihiin in ay u qaataan mas'uuliyado koradha ee isdaryeel iyo madaxbanaansho.

Barnaamijka dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) wuxuu dhiiri-geliyaa muhiimada isku xirka u dhaxeeya guriga, iskuulka iyo jaaliyada. Kani waxa kaliya oo uu aad u taabagalayaa goorta qoysaska iyo macalimiinta ay si wada jir u wada-shaqeeyaan si ay caruurta ugu dhiirgeliyaan oo ay u taageeraan inta ay waxbaranayaan oo qaadaayaan in ay gaaraan awoodooda buuxda ee suurto gal ah.



Dugsiga Barbaarinta Caruurta (Kindergarten) Caadiga

2.5 saacadood/maalintiiba
Ujra:WAXBA

Degmada 196, dhamaan ardayga dhigata dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) oo ka qeyb qaata ugu yaraan maalintiiba 2.5 saacadood cashar bixin maalintiiba. Maclimiin haysta batantiga maclimiinta ayaa dalbaya howlaha la qabanaayo ee caruurta u haboon si loo gaaro himilooyinka manhajka ee maadooyinka soo socda:

Aadaab	Hagista	Caafimaad	Saynis
Aadaabta Luqadda	Xisaabaad	Miyuusik	Aqoonta Bulshada

Macluumaad dheeraad oo ku saabsan manhajka dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten), booqo www.district196.org/curriculum/ElementarySchool/Kindergarten.htm.

Dhamaan 18ka dugsiyadaha hoose waxay bixiyaan barnaamijka dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) ee caadiga (nus-maalin). Ardayda dhigata dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) ee caadiga waxay ka qeyb galaan kulanka subaxdii ama galabtii midkooda. Kulanka uu canugaaga xaadiro waxay badanaaba ku xiran tahay xaafada aad degan tahay iyo jidka uu maro iskuulka baska u adeega xaafadaha iskuuladiina ku yaala. Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan haddii canugaaga uu xaadiri doono aroortii ama galabtii, ama su'aalo kale oo ku saabsan barnaamijka dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) ee caadiga, fadlan iskuulka ula soo xiriir. Qariidada iyo macluumaadka sida aad ula soo xiriireyso wuxuu ku yaalaa bogga 14 iyo 15.

Codsii (application) loogama baahna ardayda qorsheynaya in ay xaadiraan barnaamijka dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) ee caadiga ee iskuulada xaafadaha. Haddii iskuulka xaafadahaaga ay sidoo kale dhacdo in yahay iskuulka magnetka, uma baahnid in aad buuxsiyo (apply-gareyso) si aad u xaadirto. Eeg bogga 7 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan diiwaan-gelinta dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten).



Kindergarten Plus (K-Plus)

3.75 saacadood/maalintiiba oo dheeraad ah
Ujra: \$3,270 isu-geyn - \$327/bishiiba

Kindergarten Plus waa mid iqtiaari ah, oo uro ku salaysan, barnaamijkeeduna maalinta dheer dhameystirta dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) ee caadiga. K-Plus waa wada shaweyn u dhaxeeya Waxbarashada Dugsiga Hoose, kasoo kor ka ilaaliya barnaamijka dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) ee caadiga, iyo Waxbarashada Jaaliyahada, kasoo uu K-Plus mareeyo, barnaamij maalinta dheer.

Ardayda kuwa ka qeyb qaata K-Plus waxay maalintooda ay ku bilaabaan dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) ee caadiga ka dibna waxay sii joogayaan ilaa khadada oo lala horjooga iyo bareega, oo ka dibna waxay ku laabanayaan Kindergarten Plus ee galabtii. Isla macalimiintii shatiyaysanaa ee baraayey dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) ayaa wax ka dhigaya dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) iyo Kindergarten Plus, kuwasoo ardayda siinaya qibrad joogto ah, ee maalintii oo dhan. Macalimiinta K-Plus waxay isticmaalayaan manhajka laga dhigo dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) caadiga ee ku haboon oo intaa waxaa raaca howlo tanaadida qibradooda.

Kindergarten Plus waxaa heli kara dhamaan ardayda degan dugsiyada hoose ee Xaafada 196. (Booska fasalka oo xadidan awgeed, ardayda ka qeyb qaadanaysa Red Pine waxaa la qoodayaa lagana soo celinayaa Iskuulka Pinewood Community School ee K-Plus.) Booska barnaamijka K-Plus wuu xadidan yahay, sidaa awgeed, baqtiyanasiibka lagala soo baxaya codadka soo xaroodey taariikhda loo qabtay ayaa go'aaminaya meeleynta iyo liisaska sugida. Shuruudaha & Waxyaabaha lagu xiray (Terms & Conditions) si faahfaahsan ka eeg boggaga 8 iyo 9.

Gobolka ma maalgeliyo qeybta K-Plus ee qeybtan iqtiaariga, barnaamijka maalinta dheer. Sidaa awgeed, qoosaska ka qeyb qaadanaya waxay bixiyaan \$3,270 sanadkiiba, waxaan lagu bixiyaa toban bilood \$327 bishiiba inta uu sanad dugsiyeedka iskuulka uu socdo. Taageero lacageed ayaa diyaar u ah dadka xaafada degan kuwasoo u qalma cuntada ardayda ay iskuulka ka cunaan oo bilaashka ah ama qiima dhiman.

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan barnaamijka Kindergarten Plus, fadlan Community Education kala soo xiriir 651-423-7933 ama k-plus@district196.org. Si aad u hesho arjiga K-Plus, booqo www.district196.org/cewww/kindergartenplus. Eeg bogga 7 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan diiwaan-gelinta K-Plus.

Iskuulada Hoose Magnetka

Sedex ka mid ah 18ka iskuulada hoose ee degmada waa iskuulada magnetka. Dhamaan sedexda iskuulada magnetka waxay bixiyaan manhajka degmada caadiga, balse midkiiba wuxuu leeyahay maadooyin ku taqasuso lana xiriira manhajka degmada ee muhiimka ah. Sedexda iskuulada magnetka waa:

- Iskuulka Cedar Park Elementary Saynis, Teknooliji, Engineering iyo Xisaab (STEM);
- Diamond Path Elementary Iskuulka Barashada Caalamiga, iyo
- Glacier Hills Elementary Iskuulka Adaabta iy Sayniska.

Dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) iyo Kindergarten Plus waxaa laga helaa dhamaan sedexda iskuulada magnetka. Barnaamijka iskuulka magnetka iyo Kindergarten Plus labadoodaba kiiba wuxuu kaaga baahan yahay arji gooni ah. Eeg bogga 7 iyo 8 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan diiwaan-gelinta iskuulka magnetka.

Si aad waxbadan uga ogaato iskuulada magnetka Degmada 196 iyo dhameystirida arjiga booqo www.district196.org/MagnetSchools.

Saacadda

Ka hor canugaaga dhalashadiisa:

Dhameystir baarintaanka kore ee caruurnimada (eeg bogga 10aad)

16ka Nofembar, 2009:

Macluumaadka dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) waxaa la soo direy oo bogga internetka degmada www.district196.org

1da & 7da Janaayo, 2010:

Haweenada Macluumaadka Waalidka

6:30-8 p.m.

5ta Janaayo: Greenleaf Elementary

7da Janaayo: Glacier Hills Elementary Iskuulka Adaabta iy Sayniska

Sitimaanka 11ka Janaayo:

Barta bartamaha Iskuulada:

Booqashooyinka magnetka iyo iskuulada xaafadda

22ka Janaayo:

Arjiga Magnetka iyo K-Plus ugu dambeyta 4 p.m.

Sitimaanka Fibraayo 8da:

Helitaanka wargelinta meeleynta iskuulka magnetka iyo K-Plus
Ama liiska sugida

3da & 4ta Maarso:

Dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) iska diiwaan geli iskuulada hoose



Hanaanka Diiwaan-gelinta Dugsiga Barbaarinta Caruurta (Kindergarten)

Hadda waxaad aqrisey dalabyada ku saabsan canugaaga qibradiisa dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten). Mar haddii su'aalahaaga lagaa jawaabey oo aad qorsheysato dalabka canugaaga u wanaagsan, fadlan raac hanaanka hoose.

Haddii aad doorato:

- Dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) caadiga ee iskuulka xaafadaada
- Dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) caadiga ee iskuulka magnetka
- Iskuulka K-Plus ee xaafadaada
- Iskuulka magnetka ee K-Plus

Kani soo gudbi/ugu dambeynta:

- Arji looma baahna
- Arjiga iskuulka magnetka/22ka Janaayo
- Arjiga K-Plus/22ka Janaayo
- Arjiga iskuulka magnetka IYO K-Plus/22ka Janaayo

Waalidiinta caruurtoodu u doortey dalabka K-Plus ama iskuulka magnetka xaqiijin ayaa loo soo diri doonaa horaadka Febraayo. Inta lagu jiro sitimaanka Febraayo 14, iskuulada waxay soo diri doonaan warqad soo dhoweyn ah oo loo diri doono dhamaan ardayda dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) ka oo iskuuladooda xaadiri doona dayrta. Warqadda waxay ku siin doontaa faahfaahin ku saabsan diiwaan-gelinta dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) kasoo dhici doona 3 iyo 4 Maarso kana dhici doona canugaaga iskuulka uu xaadiri doono.

Sedex shey ayaa lagama maarmaan ahaan doontaa in in aad horey u soo qaado goorta aad canugaaga diiwaan-gelineyso dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) ee 3 ama 4 Maarso:

- Shahaadada dhalashada xaqiijineysa taariikhda canuuga uu dhashey (canugaaga waa in uu shan jir ahaadaa maalinta ama ka hor 1da Sitembar ee sanadka asaga ama ayada ay iskuulka xaadiri doonto);
- Cadeynta warqadaha talaalka (eeg bogga 10aad), iyo
- Cadeyn baadhista hore ee caruurta (eeg bogga 10aad).

Diiwaan-gelinta Kindergarten Plus

Si canugaaga xaq ugu yeesho booska diyaarka ah ee uu nasiibka ugu yeelan karo, arjigaaga Kindergarten Plus oo dhameystiran waxaa la iska doonayaa 4 p.m. 22ka Janaayo, 2010.

Laba jid oo sahlan ayaa jira oo loo buuxin karo Kindergarten Plus:

1. Online-ahaan uga buxi www.district196.org/cewww/kindergartenplus
2. Arji warqad ah soo dhameystir oo ku soo dir:

Community Education
ATTN: Kindergarten Plus
15180 Canada Avenue
Rosemount, MN, 55068

Foomamka arjiga Kindergarten Plus waxaa laga helaa dhamaan dugsiyadaha hoose, ee ku qoran bogga degmada oo ah www.district196.org/cewww/kindergartenplus, xafiiska Kindergarten Plus ee cinwaanka sare iyo soo dir, fakisgaree ama usoo emailgaree (si aad u codsato soo wac 651-423-7933).

Ogow: Diiwan gelintaada Kindergarten Plus ma badaleyso haanaanka diiwaan-gelinta dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) caadiga. Fadlan iska hubi in aad dhameystirto diiwaan-gelinta iskuulkaaga iyo hanaanka oryanteeshanka sida lagu tilmaamey.

Shuruudaha & Waxyaabaha lagu xiray Kindergarten Plus

- Si canugaaga xaq ugu yeesho baqtiyaanasiibka K-Plus ee iskuul hoose oo kasta, arjigaaga K-Plus oo dhameystiran waa in la helaa 4 p.m. 22ka Janaayo. Arjiga K-Plus waxaad ka heleysaa si aad u dhameystirto oo online-ahaan aad ugu soo dirto www.district196.org/cewww/kindergartenplus, ama waxaad u soo diri kartaa ama keeni kartaa Arjiga K-Plus.
Community Education
Attention: Kindergarten Plus
15180 Canada Avenue
Rosemount, MN 55068
- Si canugaaga xaq ugu yeesho dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) caadiga ama baqtiyaanasiibka K-Plus ee iskuulka magnetka, Sidoo kale arjigaaga iskuulka magnetka oo dhameystiran waxaa lagaa doonayaa 4 p.m. 22ka Janaayo, 2010. Arjiga iskuulka magnetka wuxuu kuugu diyaar yahay si aad u soo dhameystirto oo online-ahaan ugu soo dirto www.district196/magnetschools ama waxaad ku soo diri kartaa ama arjiga aad keeni kartaa iskuulka magnetka:
Independent School District 196
Attention: Iskuulka Magnetka Specialist
3455 153rd St. West
Rosemount, MN 55068
- Meeleynta mudnaanta ee boosaska K-Plus ee iskuulada xaafadaada kuwaasi oo aan iskuulada magnetka ahayn waxay u dhici doonaan hanaanka hoos lagu muujiyey. Magacyada waxaa lagala bixi doonaa si nasiib ah ee dhamaan arjiyada la soo gudbiyey ugu dambeyn 22ka Janaayo.
 1. Dadka degan xaafada aaggaga iskuulka;
 2. Dadka degan degmada 196 ee xaafada aaggaga iskuuleeda kala duwan, oo ay ku jirto iskuul aan ahayn iskuulada xaafadaada (laga bilaabo hal iskuul Degmada 196 ilaa iskuul kale ee Degmada 196), iyo
 3. Dadka aanan daganeyn Degmada 196, oo ay ku jiraan kuwa isqorey.
- Weeleynta mudnaanta ee boosaska K-Plus ee iskuulada magnetka ayaa la siin doonaa degnaanshaha degmada 196. Macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan hanaanka dalabka ee iskuulada magnetka waxaad ka heleysaa bogga internetka ee www.district196/magnetschools.
- Ayada oo la'isku dayaayo si loo helo fasalo labada jinsi (lab & dhiddig) ay isla siman yihiin, boosaska diyaarka ah waxaa labada jinsiba loogu qeybin doonaa si siman ilaa aysan jirin hal jinsi dheeraad ah ee u dhaxeeya arjiyada harey ee iskuulkaas.
- Ujrada K-Plus ee sanad dugsiyeedka 2010-11 waa \$3,270, laguna bixinaayo 10 bilood \$327 inta lagu jiro sanad dugsiyeedka. Taageero lacageed ayaa diyaar u ah dadka xaafada degan kuwasoo u qalma cuntada ardayda ay iskuulka ka cunaan oo bilaashka ah ama qiima dhiman. Tilmaamaha sida loo bixiyo waa loo sheegi doonaa walidiinta ka qeyb qaadanaya K-Plus.
- \$15 ayaa lagu dari doonaa jeegag kasta ee loo soo celiyo lacag aysan ku jirin awgeed.
- Ujro ayaa lagu soo dalaci doonoo dhamaan koontooyinka bixintooda laga raago. Koontooyinka lacagtooda laga raago in la bixiyo waxay dhalin kartaa in barnaamijka la iska saaro. Haddii canugaaga tan awgeed uu barnaamijka uga baxo, adiga ayaa ka mas'uul ah haraaga laguugu lee yahay ee soo hara, laga bilaabo taariikhda laga saarey.
- Waalidiinta iskooda ayay canugooda uga saari karaan barnaamijka. Hase-yeeshee, ka saaris la ogolaanayo ma jiro wixii ka dambeeya maalinta ugu horeyso ee iskuulka ilaa iyo canugaaga uu ka dhameystiro ugu yaraan 20 maalmood ee maalmaha iskuulka inta barnaamijka uu socdo. Haddii canugaaga uu ka tago barnaamijka sababtan awgeed, adiga ayaa ka mas'uul ah haraaga laguugu lee yahay, laga bilaabo taariikhda laga saarey.

- Haddii canugaaga xaq u leeyahay adeegyada Waxbarashada Gaarka, adeegyadan waxaa lagu siin doonaa sida looga bixin lahaa barnaamijyada caadiga, ee dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) ee nus maalinlaha ahaa. Marmar, ayaa sawiro laga qaadaa ardayda ka qeyb galaya barnaamijka ulajeedaduna tahay wada-hadalka waxyaabaha ku saabsan barnaamijka.
- Haddii aadan dooneyn in sawirka canugaaga loo isticmaalin ulajeedooyinkan, la soo xiriir xafiiska Kindergarten Plus ayadga oo qoraal ah.



Udiyaargarowga Dugsiga Barbaarinta Caruurta (Kindergarten)

Baaritaanka Hore Ee Caruurta

Gobolka Minnesota wuxuu dhamaan caruurta oo dhan uga baahan yahay in ay dhameystiraan baaritaan bilaash ah oo lagu ogaado wel wel caafimaad iyo/ama koritaan ee canuga uu qabo ka hor inta canuga uusan bilaabin dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) ee dugsiyada shacabka. Degmadeena, baaritaanka waxaa la qabtaa inta u dhaxeeyso sedex-iyo-bar jir iyo afar jir. Tani waxay u ogolaaneysaa waqti qibrad iskuulka ka hor iyo fursado waxbarasho/bulsho kale ee canuga manfac u ah.

Baaritaanka waxaa ka mid ah sida soo socota: ayada oo la eegaayo indhaha iyo maqalka, dhirirka iyo miisaanka, iyo muraajico lagu sameeyo talaalka. Qalab caadi ah ayaa baaritaanka loo isticmaali doonaa si loo eego kobcida canugaaga. Muraajico caafimaad iyo kobcin ayaa la socda macluumaadka iyo ilaha adiga iyo canugaaga u diyaarka ah.

Cadeyn baaritaanka ah ayaa la iskaga baahan yahay isku qorista dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) iskuulka shacabka. Haddii aad tahay dadka degan Degmada 196 oo aad leedahay canug da'diisu u dhaxeeyso sedex-iyo-bar iyo afar jir oo aan weli dhameystirin baaritaanka, fadlan wac 651-423-7899 si aad qabsato ballan.

Talaal

Canugaaga waxaa laga yaabaa in uusan xaadiri karin iskuul Minnesota ku yaala asaga oo aan haysan cadeyn talaal oo sax ah ama uusan haysan warqad diidmo oo saxiixsan qoraalkaas ah mid ogaansho ahaan talaalka ku diidaayo. Ma jirto muddo dhaafid ah. La hadal takhtarka canugaaga iyo/ama kalkaaliyada iskuulka kala hadal talaalka hadda looga baahan yahay si iskuulka loogu ogolaado.

Dakota Waaxda Caafimaadka Bulshada ee Degmada (www.co.dakota.mn.us ama 952-891-7500) waxay hayaan liis rugaha talaalka bulshada.

Summer Bridge to School

Summer Bridge to School waa barnaamijka hore iskuulka ee Community Education loogu tala galey in lagu yareeyo canugaaga u gudubkiisa dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) ayada oo la siinaayo asaga/ayada qibrado aad ula mid ah dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten). Macalimiinta waxay xooga saaraan in ay canugaaga ka caawiyaan si ay uga qeyb galo koox wada fadhin, raacista sharciga iyo hanaanka joogtada, iyo si ay u bartaan iskuulkooda dugsiga hoose. Caruurta waxay xaq u leeyihiin barnaamijka haddii ay dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) ay bilaabayaan dayrta oo ay u baahan yihiin taageero si u gudubka u noqdo mid lagu guuleysto.

Macluumaadka diiwaan-gelinta barnaamijkan wuxuu la socdaa macluumaadka diiwaan-gelinta dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) oo lagaa soo siiyay iskuulkaaga. Lacagta waxaa lagu go'aamiyaa daqliga qoyska soo gala.

952-431-8334 soo wac haddii aad qabto su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan Summer Bridge to School.

Fursadaha Barashada Hore ee Kale

Degmada 196 waxay bixiyaan fursado barasho kala duwan ee loogu tala galey caruurta dugsiga hore barbaarinta caruurta (pre-kindergarten) iyo ehelkooda ayada oo loo soo marinaayo Community Education. Booqo boggeena ama xafiiskeena soo wac si aad u hesho macluumaad dheeraad ah:

Adeegyada Caruurnimada Qoyska Hore www.district196.org/ec 952-431-8340

Tanaadinta Iskuulka hore www.district196.org/ec 952-431-8340

Canugaaga ka Caawinaya Udiyaargarowga Dugsiga Barbaarinta Caruurta (Kindergarten)

Waalidiinta waa canugooda macalimiintiisa ugu horeeyey uguna muhiimka ah. Laga bilaabo maalinta canugaaga uu dhashey, waxaad mashquul ku ahayd barista canugaaga/taada xirfado, luqad iyo fahamka dunida.

Caruurta waxay ka helaan waxbarashada oo waalidiinta waxay waxay ku dhiiri gelin karaan jacaylka waxbarashada ayaga oo:

- wax ula aqrinaaya, ka dibna kala hadlaya sheekada iyo sawiradaha
- Ka wada hadlaya xeeraraka kooxda (sida gacanta u taagista, si taxadir ku jirta in dadka kale loo dhageysto, hadalka la iska sugo, iwm.)
- Curinta sheekadaha, ka hadlaya waxyaabaha ku saabsan fekradaha, baahida ama su'aalaha
- U sharxaya sida walxaha u shaqeeyaan
- Si wada jir ah loo wada ciyaaro
- Si wada jir ah loo wada heeso oo loo bar heesaha, taasoo siinaysa fursado ay ku bartaan dhamaan noocyada miyuusiga kala duwan
- Tasoo siinaysa waqti uu ku simo saacada ciyaarata iyo saacada kale
- Tasoo canugaaga baraysa meelo cusub, waxyaabo iyo fursado waxbarasho
- Kasoo canugaaga ka caawinaya in ay baahidooda ku sheegaan oo ay ku bartaan in ay weydiyaan caawinaada goorta ay u baahan yihiin

Sidoo kale waxay caruurtooda ka caawin karaan in ay la yimaadaan xirfado wax ku ool ah kasoo taageerta in ay iskuulka ku guuleystaan:

- Ayaga oo baraktis ku sameynaya shiinyeeriga, shanqar sameynta, galuuska iyo xiriga kabaha
- Isticmaalka musqul iyo biyo-raaciska, kadibna gacmo iska dhaqista iyo qalanjinta
- Isticmaalista naabkinka iyo daboolista afka goorta la qonfacyo ama la handhisho
- Dhihista magaca hore iyo kan dambe iyo garashada magaca oo daabacan
- Isticmaalista qalamada midbayada, qalin rasas, xabagta iyo maqas
- Laga caawiyo in sheeyada lagu celiyo ka dib marka la isticmaalo

Adeegyada Degmada 196

Gaadiid

- Basaska iskuulka ayaa loo diyaariyey ardayda dhigata dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) caadiga iyo kuwa dhigta K-Plus oona degan ama aada xannaaneynta caruurta iskuulkooda u jirta in ka badan nus maayl, sidoo kale jidadka baska mara ee degmada kuna dhex yaala xaafada aaggaga iskuulka.
- Gaadiidka aroortii iyo galabtii geeya/kana soo celiya iskuulka magnetka waxaa laga helaa degmada oo dhan; gaadiidka maalin barakana geeya/kana soo celiya iskuulka magnetka ee ardayda ku nool gudaha xaafada aaggaga kaliya.
- Gaadiid kaa keena Red Pine kuna geeya Pinewood iyo kaana soo celiya K-Plus waa la helayaa.
- Dhamaan kuwa kale oo dhanna, waalidiinta ayaa mas'uul ka ah gaadiidka.
- Fadlan Gaadiidka 651-423-7685 u soo wac waxii su'aalo aad qabto.

Qadada Iskuulka

Qadada iskuulka waxay ardayda ka qeyb qaatada barnaamijka K-Plus ku cunayaan lacag. Sidoo kale ardayda guri ayay kala iman karaan qadadooda. Qof weyn ayaa la jooga inta qadada ay cunayaan si kor joogi ahaan oo ayna caruurta ka qeyb qaadata K-Plus ay caawiyaan.

Qoysaska gargaarka uga baahan lacagta qadada iskuulka waxaa laga yaabaa in ay xaq u yeeshaan lacag federaalka iyo barnaamijka cuntada iskuulka oo qiimaheedu hooseeyo. Arjiyada barnaamijka cuntada lagacteedu heeseeyso ama bilaashka ah waxaa laga helaa iskuulka canugaaga dhigto; boggooda internetka ee www.district196.org/District/Departments/FoodNutrition, iyo Adeegyada Nafaqeynta iyo Cuntada ee 651-683-6958.

Waxbarashada Gaarka


Adeegyada waxbarashada gaarka waxaa la siyaa ardayda dhigata dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) oona qaba itaal daro. Ardayda qaarkood oo ka soo gudbaya Waxbarashada Gaarka ee Caruurnimada Hore u soo gudbaya dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten), inkastoo kuwa kale qiimeyn lagu sameeyey oo la magacaabey ayada oo loo marey hanaanka barashada canuga inta lagu jirey sanadka dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten). Waxaan bixinaa adeeg joogtada, laga bilaabo goobta iskuulka caadiga ilaa barnaamijyada xarumaha ku saleysan.

Barnaamijka Barashada Luqadda Ingiriiska (ELL)

Ardayda dhigata dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) ee ku hadla luqad guri kasoo English ka duwan waxaa laga yaabaa in ay u qalmaan taageerada luqada Barnaamijka Barashada Luqadda Ingiriiska (ELL). Canugaaga iskuulkiisa weydii adeegyada ELL ama soo wac 651-423-7880 wixii macluumaad dheeraad ah.



Goobaha Dugsiga
Barbaarinta
Caruurta
(Kindergarten)



7500 Whitney Drive, Apple Valley
952-431-8360
John Garcia, Maamule



Deerwood - DW
1480 Deerwood Drive, Egan
651-683-6801
Miles Haugen, Maamule

Diamond Path - DP
Iskuulka Barashada Caalamiga
14455 Diamond Path, Apple Valley
952-423-7695
Lynn Hernandez, Maamule



Echo Park - EP
14100 County Road 11, Burnsville
952-431-8390
Sally Soliday, Maamule

Glacier Hills – GH
Iskuulka Adaabta iy Sayniska
3825 Glacier Drive, Eagan
651-683-8570
Jeff Holten, Maamule



Greenleaf - GL
13333 Galaxie Avenue, Apple Valley
952-431-8270
Michelle deKam Palmieri, Maamule

Highland - HL
14001 Pilot Knob Road, Apple Valley
952-423-7595
Chad Ryburn, Maamule

Northview - NV
965 Diffley Road, Eagan
651-683-6820
Kathy Carl, Maamule

Oak Ridge - OR
4350 Johnny Cake Ridge Road, Eagan
651-683-6970
Lisa Hannon, Maamule

Parkview - PV
6795 Gerdine Path, Rosemount
952-431-8350
Pamela Haldeman, Maamule

Pinewood - PW
4300 Dodd Road, Eagan
651-683-6980
Cris Town, Maamule

Red Pine - RP
530 Red Pine Lane, Eagan
651-423-7870
Gary Anger, Maamule

Rosemount - RE
3155 143rd St. West, Rosemount
651-423-7690
Tom Idstrom, Maamule

Shannon Park - SP
13501 Shannon Parkway, Rosemount
651-423-7670
Michael Guthrie, Maamule

Southview - SV
1025 Whitney Drive, Apple Valley
952-431-8370
Rhonda Smith, Maamule

Thomas Lake - TL
4350 Thomas Lake Road, Eagan
651-683-6890
Mary Jelinek, Maamule

Westview - WV
225 Garden View Drive, Apple Valley
952-431-8380
Karen Toomey, Maamule

Woodland - WL
945 Wescott Road, Eagan
651-683-6990
Lisa Carlson, Maamule

Ma hubid iskuulka xaafada aaggaga ee aad degan tahay?

Wac 651-423-7640 ama ka fiiri Meeleeyaha Xuduuda Iskuulka ee ku yaala bogga internetka ee Degmada 196

www.district196.org/boundary_search.cfm



INDEPENDENT SCHOOL DISTRICT

**Rosemount-Apple Valley-Eagan
Public Schools**

#196

Educating our students to reach their full potential

3455 153rd St. West, Rosemount, MN 55068

www.district196.org



Guddiga Iskuulka

Joel Albright
Art Coulson
Rob Duchscher
Jackie Magnuson
Mike Roseen
Kevin Sampers
Bob Schutte

Shaqaalaha Degmada

Jane K. Berenz, Muraaqib
Jim Brandl, Agaasimaha Jaaliyada Waxbarashada
Dr. Julie Olson, Agaasimaha Waxbarashada Dugsiyada Hoose
Khia Bruse, Maareeyaha Adeegaha Waxbarashada
(Kindergarten Plus)
Shane Schmeichel, Takhasusha Iskuulka Magnetka

Dugsiga Barbaarinta Caruurta (Kindergarten)

Caadiga
Iskuulkaaga Hoose
ama Waxbarashada Dugsiga Hoose
651-423-7739

Kindergarten Plus

Community Education
651-423-7933
www.district196.org/cewww/kindergartenplus

Iskuulada Magnetka

651-423-7911
www.district196.org/magnetschools

Degmada 196 faraha lama gasho takoor sharci daro ah oo lagu saleeyo jinsi, midad, waxa qofka uu haysto, halka uu ka soo jeedo, jinsiga, xaalad guur, itaal daro, xalad la xiriira qaadashada gargaarka bulshada, hanaan-jinsi ama da'. Qareenka degmo dugsiyeedka, 3455 153rd St. West, Rosemount, MN 55068, 651-423-7883, ayaa loo magacaabeyn in ka jawaabo su'aalo kasta ee la xiriira sharciyada aan la xiriirin takoor daro, oo ay ku jirto su'aalaha hoos yimaada Title IX.